# Baaritaanka Dabeecadda Ee La Dabakho



*Hagaha Waalidka*

AUTISM SPEAKS®
ATN
Autism Treatment Network

AIR-P
Autism Intervention Research Network on Physical Health

*Walxahan waa wax ka dhashay waxqabadyada Shabakada Daaweynta Xanuunka Dhimanaanshaha ee Autisma Speaks, oo ah barnaamij la maalgelisay oo ay iska leedahay Autism Speaks. Waxaana taageera heshiiska wada shaqayn ee UA3 MC 11054 ayadoo loo marayo Waaxada Adeegyada Dadka iyo Caafimaadka ee Mareykanka, Khayraadka Caafimaadka iyo Maamulka Adeegyada, Barnaamijka Cilmi-baarista Caafimaadka Cunuga iyo Dhanka Hooyo ee Isbitaalka Guud ee Massachusetts.*

***Xirmadan qalabka ah waa hage xogeedka*** Baaritaanka Dabeecadda Ee La Dabakho (ABA). Waxaa loo qaabeeyay in uu ku siiyo **fahanka wanaagsan ee ABA**, **sida cunugaaga uu u faa'iidi karo**, iyo **goobta/sida aad u raadsan kartid adeegyada ABA.**

## WAA MAXAY ABA?

### "ABA" waxay u taagan tahay Baaritaanka Dabeecadda Ee La Dabakho.

ABA waa xeerar go'an ee sameeya asalada loogu talagalay daaweynta dabeecadda la xiriira oo badan. ABA waxay ku salaysan tahay cilmiga barashada iyo dabeecadda. Cilmiga waxaa ka mid ah "sharciyo" guud oo ku saabsan sida dabeecadda u shaqayso iyo sida barashada ay u dhaceysa. Daaweynta ABA waxay u adeegsaneysaa sharciyadan daaweynta dabeecadda hab ay caawimaad kaga gaysanayso kordhinta dabeecadaha waxtarka leh ama la rabo. ABA sidoo kale waxay adeegsanaysaa sharciyadan si ay caawimaad ugu gaysato yaraynta dabeecadaha laga yaabo in ay farageliyaan barashada ama dabeecadaha laga yaabo in ay waxyeelo leeyihiin. Daaweynta ABA waxaa loo isticmaalaa in lagu kordhiyo xirfadaha hadalka iyo luuqadda. Waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu horumariyo feejignaanta, xoog-saaridda, xirfadaha bulshada, xusuusta, iyo aqoonta. ABA waxaa loo isticmaali karaa in ay caawimaad ka geystaan yareynta dabeecadaha dhibaatada leh.

ABA waxaa u tixgeliya in ay tahay dhaqanka daaweynta "ugu fiican" ee caddayn-ku-salaysan Takhtarka Khaliinka Guud ee Mareykanka iyo Ururka Cilmi-nafsiga Mareykanka. "Caddayn ku salaysan" waxaa loola jeedaa in ABA ay u marey tijaabooyin cilmi waxtarkeeda, tayadeeda, iyo saamaynteedaba.

Daaweynta ABA waxaa ka mid ah xeelado badan oo kala duwan. Xeeladahan dhammaantooda waxay xooga saaraan hordhacyada (waxa dhacaya kahor inta dabeecadda aysan dhicin) iyo natiijooyinka (waxa dhacaya kadib dabeecadda). Hal xeelad waa " xoojin hubaal ah." Marka dabeecad uu soo raaco wax la qiimeeyo (abaal-marin), dabeecadaasi waxay aad ugu dhowdahay in lagu soo celiyo. ABA waxay u isticmaalaysaa xoojinta hubaalka ah hab la cabbiro karo si ay caawimaad ugu geysato keenidda isbaddel dabeecadeed oo macno weyn ku fadhiya.

### ABA Oo Kooban

Fahmidda (iyo wax kabaddelidda) dabeecadda macnaha guud ee jawiga waa salka daaweynta ABA.

- "***Dabeecadda***"waxaa loola jeedaa xirfadaha iyo ficilada nooc kasta leh (kaliya ma aha dhaqan xumada).
- "***Jawiga***" waxaa ka mid ah dhammaan dhacdooyinka bulshada iyo kuwa jir-ahaaneed ee nooc kasta leh ee laga yaabo in ay beddesho ama ay baddelaan dabeecadda qofka.

***Noocyada daaweynta ku salaysan xeerarka ABA oo waxyar ah*** waxay kala yihiin ***barashada tijaabada gaarka ah, waxbarista dheeraadka ah (ama tababarka jawiga dibiiciga ah), dabeecadda hadalka, tababarka jawaabta ahmiyadda sare leh, iyo hannaanka luuqadda dabiiciga ah (ka eeg faahfaahinta bogga xiga).*** Dhammaan daaweynyadan ku salaysan-ABA:



- Waa kuwo nidaamsan
- Waa kuwa Aruuriya xogta loogu talagalay xirfadaha ama dabeecadaha bartilmaameedka ah
- Waa kuwo bixiya xeelado huhbaal ah oo lagu beddalayo jawaab-celinada a iyo dabeecadaha

ABA waxay xooga saartaa xeeladaha xoojinta hubaalka ah. Waxay caawin kartaa carruurta qabta dhibaatada barashada ama kasbashada xirfado cusub. Waxay sidoo kale ka hadli kartaa dabeecadaha dhibaatada ah ee faragelinaya shaqaynta ayadoo la marayo nidaam loo yaqaano "qiimeynta dabeecadda la xiriirta shaqeynta."

Xeerarka iyo hababka baaritaanka dabeecadda waxaa loo adeegsadey si sidii larabey saameyn u leh xaalado badan si loo sameeyo xirfado nooc kasta leh ee barteyaasha leh ama aan lahayn naafonimo.

***Barashada Tijaabada Gaarka ah leh (Tababar)*** waxay ku salaysan tahay fahanka ah in tababar-qaadashada ay ku caawinayso cunug in uu si fiican u qaybo xirfad. Waa daaweyn nidaamsan ee isticmaalaysa hab waxbarid hal-hal qof ah waxayna ku lug leedahay waxbarashada khaas ah oo dabeecado gaar ah leh. Waxbarashada khaaska ah ee dabeecadda gaarka leh waxaa loo yaqaanaa “carbis.” Carbisyada waxay ku caawinayaan barashada sababtoo ah waxay ku lug leeyihiin ku celcelin. Cunuga wuxuu u dhammeynayaa hawl marar badan si isku hab ah (sida caadiga ah 5 ama ka badan). Ku celcelintan waxay si gaar ah muhiim ugu tahay carruurta laga yaabo in ay u baahan yihiin qadar badan oo tababar-qaadasho ah si ay si fiican ugu qayban xirfadda. Ku celcelinta waxay sidoo kale ku caawinaysaa in ay xoojiso xusuusta mustaqbalka fog ah. Dabeecadaha gaarka ah (indha iskudhaca, feejignaanta xoogsaaridda leh iyo barashada muuqa wajiga) waxaa loo kala qaadaa qaababka ugu fudud, markaasi kadibna si nidaamsan ayaa loogu kalifaa ama loogu hagaa. Carruurta waxay helayaan xoojin hubaal ah (tusaale ahaan: salaanta-sacabbada la isku dhufto, ammaan hadal ah, iyo bir lacag u eg oo lagu baddelan karo walxaha carruurta ku ciyaaraan) si loo soosaaro dabeecadahan. Tusaale ahaan, takhtarad iyo cunug ayaa wada fadhiya miis takhtarada waxay ku kallifaysaa cunuga in uu ayada feejignaan siiyo ayadoo ku dhaheysa “ isoo fiiri.” Cunuga wuxuu kor u fiirinayaa takhtarada kadibna takhtarada waxay ugu abaal-marinaysaa in ay ku salaanto salaanta sacabbada la isku dhufto.

***Waxbarista Dheeraadka ah (ama Tababarka Jawiga Dabiiciga ah)*** waxay ku saleysan tahay fahanka ah in ay muhiim tahay in la siiyo micnaha noolasha dhabta ah ee xirfadaha cunug uu baranayo. Waxaa ka mid ah xoogsaaridda xirfadaha waxbarista ee ka jira gundhigyada uu cunugaaga sida dabiiciga ah u isticmaalayo. Ku isticmaalidda jawiga maalin kasta ee dabiiciga ah daaweynta waxay caawimaad ka gaysan kartaa kordhinta wareejinta xirfadaha loogu wareejinayo xaaladaha maalin kasta waxayna ku caawinaysaa guud-ahaansho ka dhigidda. Waxbarista dheeraadka ah, macalinka ama takhtarka waxay ka faa’iideysanayaan fursadaha sida dabiiciga ah u dhaca si ay ugu caawiyaan cunuga in uu barto luuqadda. Waxqabadka ama xaaladda waxaa dooranaya cunuga, daryeelaha ama macalinkana waxay raacayaan hoggaaminta ama xiisaynta cunuga. Xeeladahan waxbarista waxaa loo sameeyay si loo fududeeyo guud-ahaanshaha iyo si heerka ugu sareeya loo gaarsiiyo xoojinta. Marka xaaladaha sida dabiiciga ah u dhaca ee cunuga u muujinayo xiisayn la aqoonsado, tilmaan-bixiyeha markaasi wuxuu isticmaalayaa eray-xasuuseed laga qalin-jabiyay si loo dhiirigeliyo jawaabcelinada cunuga. Tusaale ahaan, cunuga ayaa ku ciyaaraya wiifowyada wuxuuna u baahan yahay takhtarka in uu riixo sidaas awgeed wuxuu u laalaadayaa si sare. Takhtarka wuxuu sugayaa cunuga in uu wayddiisto riixid. Kaliyada marka uu cunuga wayddiisto ayuu takhtarka riixayaa wiifowga. Takhtarka wuxuu sugayaa in cunuga uu wayddiisto waqti kasta kahor inta asaga/ayada aysan riixin cunuga mar kale.

***Dabeecadda Hadalka*** waxay la mid tahay tababarka tijaabadda gaarka ah sidaasi awgeed waa daaweyn nidaamsan, waana daaweyn khaas ah oo hal-hal qof ah. Waxay kaga duwan tahay tababarka tijaabada gaarka ah in loo qaabeeyay si ay u kicisi niyada cunuga si uu u barto luuqad ayadoo la sameynayo xiriir ka dhaxeeyo eray iyo micnihiisa. Carruuraha qaarkood, si loo baro eray ama calaamad waxay u baahan yihiin in lagu daro xoog-saarid ka fiirsasho leh oo ku saabsan baridda ayaga la barayo sida ay ugu isticmaalaan erayadooda si shaqeynaysa (Tusaale, Kani waa maxay? Koob. Maxaad koobka u isticmaalaysaa? Cabbid. Maxaad wax ku cabbtaa? Koob.)

***Tababarka Jawaabta Ahmiyadda Sare*** waa faragelin dabeecadda ka yimid, si dabacsan loo nidaamiyay, oona ku tiirsan fursadaha waxbarista sida dabiiciga ah u dhaca iyo natiijooyinka ka dhalanaya. Bartilmaameedka PRT waa kordhinta kicinta ayadoo lagu darayo waxyaabaha uu ka kooban yahay sida door-qaadasho, xoojinta isku dayada, dookha-cunuga, iyo ku dhexdaridda hawlo hagaajin (hore-loo soo bartey). Waxay ka qaadeysaa bartilmaameedka goobaha yaraanshaha waxayna ku aadinaysaa feejignaanta goobaha ahmiyad sare leh qaarkood ee loo arko in ay muhiim u yihiin shaqaynta carruurta oo nooc kasta leh. Afar goobood oo ahmiyad sare leh ayaa la aqoonsadey: (a) dhiirigalin, (b) is-baridda cunuga, (c) is-maamulidda, iyo (d) ka jawaabidda baaqyo badan. Waxaa la aaminsan yahay in marka goobahan laga taageero, in ay soosaarayaan horumar laga gaaro dabeecadaha aan la bartilmaameedsan badankood. “Qaabka Denver ee Hore U Bilaabidda” waa qaab faragelin dabeecadeed oo waqti hore ah oo ku habboon carruurta jirta laga soo bilaabo da’da 18 bilood. Qaabkan wuxuu ku leeyahay xoogsaarid aad ah Tababarka Jawaabta Ahamiyadda Sare leh.

***Hannaanka Luuqadda Dabiiciga ah (NLP)*** wuxuu ku saleysan yahay fahanka in barashada lagu caawin karo diyaargareynta jawiga oo laga baraandegay si loo kordhiyo fursadaha lagu isticmaalayo luuqad. NLP wuxuu xoogasaarayaa ambaqaadidda cunuga. Wuxuu isticmaalayaa xoojiyeyaal dabiici ah ee ah natiijooyinka sida tooska ah ula xiriirta dabeecadda, wuxuuna dhiirigelinayaa guud-ahaansho ka dhigidda xirfadda. Tusaale ahaan, cunuga loo oggolaaday in uu baxo kadib marka la baro in uu dhaho “nabadey” wuxuu leeyahay ixtimaal badan oo ah in uu isticmaalo uuna guud-ahaan ka dhigo eraygan marka loo barbardhigo cunuga helaya shay la taaban karo asagoo ku celinaya eraygan. NLP wuxuu u wareejinayaa tilmaan-bixinta laga helo qolka daaweynta jawiga maalin kasta ee cunuga ayadoo dantu tahay in cunuga uu u adeegayo sidii barta bilaawga ee faragelinyada.

## HABABKA ABA WAXAY U TAAGEERAYAAN SHAKHSIYAADKA QABA XANUUNKA DHIMANAANSHAHA HABAB KALA DUWAN:

- ✓ **Waxay barayaan xirfadaha lagu beddelayo dabeecadaha dhibaatada ah.** Sidaas awgeed cunugaaga wuxuu baran karaa waxa “la sameynayo,” kaliya ma aha waxa “uu joojinayo in uu sameeyo.”
- ✓ **Waxay kordhinayaan dabeecadda fiican** waxayna **yareynayaan dabeecadda faragelinta leh.** Tusaale ahaan, habraacyada xoojinta waxay kordhinayaan dabeecadda hawsha ama isdhexgalka bulshada waxayna yareynayaan dabeecadaha sida is-dhaawicidda ama dhaqdhaqaaqa lagu celceliyo.
- ✓ **Waxay ilaalinayaan dabeecadaha.** Tusaale ahaan: Baridda habraacyada is-xakameynta iyo is-ilaalinta si loo ilaaliyo ama wax guud looga dhigo xirfadaha bulshada ee la xiriira-shaqada.
- ✓ **Waxay beddelaan jawaab-celinada dabeecadda cunugaaga.** Jawaab-celinadan waxay si aan kama ahayn u abaal-marinayaan dabeecadda dhibaatada ah.
- ✓ **Waxay kordhinayaan xirfadaha aqoonta, bulshada, iyo is-caawinta ee cunugaaga**
- ✓ Waxay sare u qaadayaan awooda **xoogsaaridda** hawlaha, **yeelidda** hawlaha, waxayna kordhinayaan **dhiiragelinta ah** in la fuliyo.
- ✓ Waxay ujeeddadooda yihiin in ay **sare u-qaadaan xirfadaha garashada**. Waxay ku caawinayaan cunugaaga **in uu aad diyaar ugu noqdo waxbarasho**.
- ✓ **Waxay guud-ahaan ka dhigayaan ama u wareejinayaan dabeecadda hal xaalad** ama kaga jawaab-crlinayaan mid kale (Tasaale ahaan, ka tagidda dhammeystirka shaqooyinka qolka khayraadka aadidda in laga fuliya fasalka caadiga ah).

### ABA Cunugeyga Maka Faa’iideyaa?

cunugaaga…

- ✓…dhibaato maku qabaa waxbarashada?
- ✓…dhibaatooyin maku qabaa kasbashada xirfado cusub?
- ✓…dhibaato maku qabaa hadalka?
- ✓…ma marayey dabeecaddaha dhibaatada ah* ee gela habka shaqeynta?

Haddii cunugaaga uu qabo mid ka mid ah kuwan ama dabeecado kale ee khuseymo leh, xeelad ku saleysan-ABA ee faragelinaysa dabeecadda ayaa laga yaabaa in ay waxtar u leedahay.

*Dabeecadaha dhibaatada ah waxaa ka mid noqon kara dhirifka ama carada, dagaal gardaro ah bilaabidda, ama is-dhaawicidda.

## ABA SIDEE AYUU U EG YAHAY?

ABA waa hab ballaaran oo adag in la qeexo sida uu u ekaan lahaa barnaamij miisaalkiisa ah. Caddadka daaweynta iyo heerka ku lug lahaanshaha bukaanka way kala duwan yihiin, sida badan marka loo eego baahiyada gaarka ah ee cunuga. Barnaamijyada tababarka xirfadaha ABA (sida tababarka tijaabada gaarka ah, waxbarista dheeraadka ah) waxay u baahan karaan dhawr saacadood maalin kasta. Ayadoo barnaamijyada tababarka xirfadaha ay sida badan ay fuliyaan takhaatiirta dabeecadda ama macalimiinta, waalidiinta sida badan waxaa la baraa xirfadaha hawsha u baahan si ay ugu caawiyaan carruurtooda in ay u wareejiyaan waxa ay ku barteen daaweynta noolasha maalin kasta.

Barnaamijyada tababarka xirfadaha ABA ee loogu talagalay carruurta yaryar waxay sida badan ku salaysan yihiin guriga waxayna u baahan yihiin walxo gaar ah iyo goob u go’an in lagu shaqeeyo. Daaweynta wax ka beddelidda dabeecadda ABA waxaa ka mid noqon kara 1-2 saacadood oo tababarka waalidka ah toddobaad kasta ayadoo waalidiinta isticmaalayaan xeeladaha ay bartaan inta u dhaxeyso booqashooyinka. Takhtarka ABA waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu kala tashado macalimiinta in ay caawimaad ka geystaan ku taageeridda dabeecadaha fiican fasalka gudahiisa.

**Talaabada ugu horeysa ee tababarka xirfadaha** inta lagu guda jiro xiisadda ABA sida caadiga ah waxaa ka mid ah xog wareysi waalidka ah oo qotodheer iyo cabbiraad qiimeyn sida

**Qiimeynta Luuqadda Aasaasiga ah iyo Xirfadaha Waxbarashada “ABLLS-R”**

ama

**Qiimeynta Hadalka iyo Barnaamijka Meelaynta“VB-MAP”**

## WAXA UU KA KOOBAN YAHAY BARNAAMIJKA ABA EE XOOGAN

- ***Maareyn*** – Barnaamijka waa in ay qaabeeyaan ayna ilaaliyaan Baare Dabeecadeed oo ay Shahaado Siiyeen Guddi (BCBA) ama qof haysta shahaadooyin la mid ah. Horjoogeyaasha waa in ay haystaan khibrad ballaaran ee ah la shaqaynta carruurta qabta xanuunka dhimanaanshaha.

- ***Tababar*** – Dhammaan ka qaybgaleyaasha waa in si buuxda loo tababaraa, ayadoo horjoogeyaasha ay siinayaan taageero, ilaalin, iyo tababar socda oo loogu talagalay muddada tababarka.

- ***Barnaamij diyaarin*** – Barnaamijka waa in la abuuraa kadib marka la sameeyo qiimeyn faahfaahsan looguna talagalay xirfadaha iyo hoos-udhaca gaarka ah ee cunuga. Door-bidashooyinka qoyska iyo barteha waa la tixgeliyaa si loo go'aamiyo yoolalka daaweynta. Guud-ahaan ka dhigidda hawlaha waa in lagu dhisaa barnaamijka si loo hubsado ku fulinta xirfadaha jawiyo badan.

- ***Dejinta barnaamijka Shaqaynaya*** – Yoolalka la doortey waa in ay faa'iido u yeeshaan una shaqeeyaan shakhsiga waana in ay kordhiyaan ama wanaajiyaan tayada noolashiisa/noolasheeda. Isku jirka daaweynta baaritaanka dabeecadda ku salaysan waa in la isticmaalaa sidaas awgeed cunuga wuxuu helayaa fursad uu u baranayo habab kala duwan.

- ***Xog aruurinta*** – Xogta ku saabsan barashada xirfad iyo yaraynta dabeecadda waa in la diiwaangeliyaa si joogto ahna baaritaan loogu sameeyaa. Xogtan waa in ay dib-u hubin ku sameeyaan hor-joogeha loona isticmaalaa in lagu cabbiro horumarka shakhsiga waana in ay bixiyaan xogta loogu talagalay qorshaynta barnaamij.

- ***Tababarka qoys*** –Xubnaha qoyska waa in la tababaraa si loo baro ama loo xoojiyo xirfado. Waa in ay ku lug yeeshaan nidaamka dib-u hubinta iyo qorshaynta labaduba.

- ***Kullumada Kooxda*** ee ka qaybqaadanaya daaweyeyaasha, hor-joogaha iyo xubnaha qoyska ee ku lugta leh waa muhiim si loo sii wado joogtaynta, loo muujiyo arrimaha la xiriira iyo in laga hadlo horumar.







## YAA BIXIYA ADEEGYADA ABA?

Bixiyeyaasha ABA waxay ku kala duwanaan karaan tababarka, khibradda, iyo shahaado qaadashada:

- **Shahaado-qaadasha ABA**: Daaweyeyaasha waxaa shahaado la siin karaa ayadoo loo marayo Guddiga Shahaado siinta Baaraha Dabeecadda. Haddii ay yihiin kuwo guddiga shaqaado siiyay ayna haystaan ugu yaraan darajo shahaado Mastareyd ah, markaasi waxay ku yeelanayaan xarfaha BCBA magacooda kadib. BCBA-D waxaa loola jeedaa in ay haystaan darajada shahaadada ugu sareysa jaamacadda. Daaweeyeyaasha kale waxaa laga yaabaa in ay haystaan shahaada BCABA. Tani waxaa laga wadaa waxbarashada ABA waa heerka Shahaadada jaamacadda ee bajalarka.

- **Khibradda ABA**: Daaweyeyaasha ABA qaarkood waxaa laga yaabaa in ay u leeyihiin sannado badan oo khibarad ah bixinta ABA balse waxaa laga yaabaa aysan si rasmi ah "shahaado ugu haysanin." Daaweyeyaasha ABA ee aan haysan shahaadada waxaa laga yabaa in ay ku soo hoos tababarteen shaqadoodadana uu hor-jooge ka ahaa daaweeye ABA oo shahaado haysta. Ayadoo daaweyeyaasha aan shahaadada haysanin ay bixin karaan tababarka xirfadaha ABA ee shakhsi ahaaneed, waa in uu hor-jooge u noqdaa qof haysta shahaado ama khibrad la mid.

> Marka la raadinayo adeegyada ABA, waa muhiim in aad codsatod iyo in aad heshid xog ku saabsan khibradda daaweeyaha. Wayddii asaga ama ayada in uu ka ***keeno tixraacyo*** waalidiinta ama daryeeleyaasha kale.

## HALKEE LAGU BIXIYAA DAAWEYNTA ABA?

ABA waxaa lagu bixin karaa dugsiga, guriga, ama bulshada gudaheeda ayadoo ay ku xiran tahay baahiyada cunuga iyo adeegyada laga heli karo goob gaar ah. Barnaamijyada dugsiga qaarkood waxay ku isticmaalaan xeeladaha ABA fasalka gudahiisa. Waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa si qayb ka mid ah qorshaha waxbarashada shakhsi-ahaaneed ee cunuga ahaan ("IEP"). Waxaa intaasi sii dheer, daaweeyeyaasha salkooda-bulshada yahay waxaa laga yaabaa in ay ABA ku bixiyaan guriga carruurta laga helay in ay qabaan xanuunka dhimanaanshaha.

Magaalooyinka waaweyn ama dhexdhexaadka ah badankooda waxay yeelanayaan daaweeyeyaal ABA oo shahaado xirfadeed haysta. Magaalooyinka yaryar iyo baadiyaha waxaa laga yaabaa in aysan lahayn. Tani waa sababta wayddiinta khibradda bixiyeha ay muhiim u tahay.

## SIDEEN KU HELI KARAA ADEEGYADA ABA?

- Eeg cutubka deegaankaaga ee Autism Speaks ama booqo lifaaqa Adeegyada Qoyska ee ku qoran bogga internetka ee Autism Speaks: www.autismspeaks.org. Raadi adeegyada ABA ee lagu bixiyo gobolkaaga.

- Eeg cutubka deegaankaaga ee Ururka Xanuunka Dhimanaanshaha (Autism) Mareykanka. Booqo boggooda internetka www.autismsociety.org si aad u oggaatid ilaha gobol-gobolka ah.

- Ka hel Baareyaasha Dabeecadda ee uu Guddiga Shahaado siiyay www.bacb.com.

- Kala hadal kooxda waxbarashada cunugaaga wixii ku saabsan bixiyeyaasha deegaanka.

- Kala hadal qoysaska la nool xanuunka dhimanaanshaha ee kooxaha taageerada deegaanka.

## Caynsanaanta Caymiska ee loogu talagalay ABA

Shirkadaha caymiska waxay ku kala duwan yahiin rabitaankooda ah in ay bixiyaan lacagaha daaweeyeyaasha ABA. Siyaasadaha waxay sidoo kale ku kala duwan yihiin gobolba gobolka kale. Waxaad u baahanaysaa in aad eegtid heshiiskaaga si aad u go'aamisid haddii adeegyada ABA la daboolayo ama lacag-celin laguugu sameynaayo.

## ILAHA

Waaxda Adeegyada Qoyska ee Autism Speaks waxay bixisaa ilo, xirmooyin qalab, iyo taageero si ay caawimaad ugu geysato maareynta caqabadaha maalin kasta ah ee la noolashada xanuunka dhimanaanshaha (www.autismspeaks.org/family-services). Haddii aad daneynaysid in aad la hadashid xubin ka mid ah Kooxda Adeegyada Qoyska ee Autism Speaks kala xiriir Kooxda Ka Jawaab-celiya Xanuunka Dhimanaanshaha (ART) 888-AUTISM2 (288-4762), ama emayl ahaan familyservices@autismspeaks.org.

ART En Español al 888-772-9050.

### Boggaga Internetka

Ka akhri wixii ku saabsan daaweynta caddaynta-ku-salaysan ee loogu talagalay xanuunka dhimanaanshaha:

- Bogga internetka ee Xarunta Xanuunka Dhimanaanshaha Qaranka www.nationalautismcenter.org
- Bogga internetka ee Hay'adda Cilmi-baarista Xanuunka Dhimanaanshaha (OAR) www.researchautism.org

## MAHADNAQ

Daabacaaddan waxaa sameeyay xubnaha Shabakada Daaweynta Xanuunka Dhimanaanshaha ee Autism Speaks / Shabakada Cilmi-baarista Faragelinta Xanuunka Dhimanaanshaha ee ku saabsan Caafimaadka Jir-ahaaneed- Guddiga Cilmiyada Caafimaadka Dabeecadda la xiriira. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqaynaa Nicole Bing, PsyD (Isbitaalka Carruurta Cincinnati/Cincinnati Children's Hospital), Erica Kovacs, Ph.D. (Jaamacadda Columbia/Columbia University), Darryn Sikora, Ph.D. (Jaamacadda Caafimaadka & Sayniska ee Oregon/Oregon Health & Science University), Laura Silverman, Ph.D. (Jaamacadda Rochester/University of Rochester), Johanna Lantz, Ph.D. (Jaamacadda Columbia/Columbia University), Benjamin Handen, Ph.D. (Jaamacadda Pittsburgh/University of Pittsburgh), Rebecca Rieger, BA (Jaamacadda Columbia/Columbia University), Zonya Mitchell, Psy.D., (Jaamacadda Columbia/Columbia University), and Laura Srivorakiat, M.A. (Isbitaalka Carruurta Cincinnati/Cincinnati Children's Hospital) shaqada ay ka geysteen daabacadda.

Waxaa tafaftiray, qaabeeyay, soona saarey Shabakada Daaweynta Xanuunka Dhimanaanshaha ee Speaks Autism / Shabakada Cilmi-baarista Faragelinta Xanuunka Dhimanaanshaha ee ku saabsan Caafimaadka Jir-ahaaneed waaxda hadalka. Waxaan ugu mahadnaqaynaa dib-u hubinta iyo soo jeedinta kuwo badan, oo ay ku jiraan qoysaska la xiriira Shabakada Daaweynta Xanuunka Dhimanaanshaha ee Autism Speaks. Daabacaddan waxaa loo qaybin karaa sida ay tahay, si lacag la'aanah , waxaa laga yaabaa in si gaar ah loogu dhigto sidii fayl elektaroonig ah si aad u soo-saartid ama aad u faafisid, sidaas awgeed waxay ka mid noqon kartaa ururkaaga iyo udirisyadiisa soo noqnoqoshada badan leh. Si aad u heshid xogta muraajaceynyta, fadlan la xiriir atn@autismspeaks.org

Walxahan waa wax ka dhashay waxqabadyada Shabakada Daaweynta Xanuunka Dhimanaanshaha ee Autisma Speaks, oo ah barnaamij la maalgelisay oo ay iska leedahay Autism Speaks. Waxaana taageera heshiiska wada shaqayn ee UA3 MC 11054 ayadoo loo marayo Waaxada Adeegyada Dadka iyo Caafimaadka ee Mareykanka, Khayraadka Caafimaadka iyo Maamulka Adeegyada, Barnaamijka Cilmi-baarista Caafimaadka Cunuga iyo Dhanka Hooyo ee Isbitaalka Guud ee Massachusetts. Waxyaabaha ku qoran waxaa mas'uuliyadooda leh kaliya qorayaasha khasabna ma aha in ay matalaan arragtiyada rasmiga ah ee MCHB,HRSA, HHS. Muuqaalada xirmadan qalabka waxaa laga soo iibsadey istockphoto®. La qoray Maajo 2012.

---

REAL ACTION FOR AUTISM
RESOURCES, EDUCATION, AND LINKED PARTNERS

Translation of these materials supported by grant funds through the U.S. Department of Health and Human Services, Health Resources and Services Administration (HRSA, CFDA 99.110).

AUTISM SPEAKS® ATN Autism Treatment Network

AIR-P Autism Intervention Research Network on Physical Health